# GUUDMARKA Qorshaha la Xoojiyey ee ESSA ee Washington

Oofinta shuruudaha Qaybta 8302 ee Xeerka Waxbarashada Dugsiyada Hoose iyo Sare ee 1965 (ESEA), ee lagu kabay Xeerka Arday Kastaa Ha Guulaysto (ESSA)

# QABYO QORAAL

U.S. Department of Education

Dib U Eegid Lagu Sameeyay:
August 7, 2017

# Tusmadda Qoraalka

Hordhaca Guudmarka Qorshaha La Xoojiyay .....3

Ku Saabsan Barnaamijyada Waxbarashada Federaalka .....4

A. Cinwaanka I, Qaybta A: Horumarinta Barnaamijyada Aasaasiga ee Hay'adaha Waxbarashada Deegaanka .....6

B. Cinwaanka I, Qaybta C: Waxbarashada Carruurta Soo-Galaytiga.....9

C. Cinwaanka I, Qaybta D: Barnaamijyada Kahortagga iyo Wax-ka-qabadka ee Carruurta iyo Dadka Yaryar ee La Dayacay, Inay Dambi Galaan u Dhaw, ama Khatar Ku Jira.....10

D. Cinwaanka II, Qaybta A: Taageeridda Waxbaris Wax-ku-ool ah.....11

E. Cinwaanka III, Qaybta A, Hormo-qaybeedka 1: Barashada Luuqadda Ingiriisiga ah iyo Hormarinta Luuqadda 14

F. Cinwaanka IV, Qaybta A: Deeqaha Taageerada Ardayda iyo Xoojinta Waxbarashada .....15

G. Cinwaanka IV, Qaybta B: Xarumaha Barashada Bulshada Qarniga 21aad.....16

H. Cinwaanka V, Qaybta B, Hormo-qaybeedka 2: Barnaamijka Dugsiyada Dadka Miyiga iyo Saboolka.....17

I. Waxbarashada Barnaamijka Carruurta iyo Dhalinyarada Derbi-jiifka ah, Xeerka Kaalmada Derbi-jiifka McKinney-Vento, Cinwaanka VII, Qayb-hoosaadda B .....18

# Hordhaca Guudmarka Qorshaha la Xoojiyay

Dokumentigan waxa ku qoran guudmar Qorshaha la Xoojiyey ee ESSA ee Washington si loo oofiyo ujeedooyinka Xeerka Arday Kastaa Ha Guulaysto. ESSA waxay beddeshay Ilmana Waa Inaan La Dhaafin ee Diseembar 10, 2015, isagoo ah dib-u-meelmarinta Xeerka Waxbarashada Dugsiyada Hoose iyo Sare. ESSA waxay si buuxda u hirgali doontaa sanad dugsiyeedka 2017-18.

ESSA waxay beddeshay wejiga waxbarashada ee waddanka oo dhan. Waa mid dabacsan oo furfuran, isagoo u oggolaanaya degmo dugsiyeedyada deegaanka inay si dhaanta sidan u buuxiyaan baahiyaha ardaydooda.

ESSA wuxuu u oggolaanayaa gobollada inay kala-jajabiyaan qaabdhismeedyada waxbarashada, wuxuuna saamaxayaa dabacsanaan isticmaalka maalgalinta si loo kasbado natiijooyin kuwii hore dhaama xagga ardayda. ESSA wuxuu xoog badan saaraa kaqaybgalka qoyska iyo bulshada. ESSA wuxuu si toos ah u waajahaa galdaloolka fursadda ee arday badan wajahan, isagoo faraya nidaamka waxbarashada gobolka inay raadraacaan xogta kusaabsan sida ardayga loogu adeego, cidda wax baraysa, iyo taagyeerooyinka diyaarsan si loo hubiyo ardayda oo dhan inay awoodaan helitaanka waxbarasho tayo sare leh.

Waa qorshe loo meelmariyay si diirada loo saaro guusha ardayga. Waa kala guur muhiim ah oo nidaamka waxbarasho ee gobolkeena ah, oo ku dhisan jidka waxbarashada ee casriyeynta iyo tayada ugu sarreysa oo gaadhaysa 1.1 milyan oo arday. Waa midhaha shaqo soo socotay toban sano, oo ka kooban 12 koox shaqeed, koox hogaamineed, iyo koox qorshaha la xoojiyey. Kooxda shaqada waxaa xubno ka ah in kabadan 200 oo xubnood oo gobolka oo dhan iskaga kala yimid, kuwaas oo ay kamid yihiin kuwa ka kala socday waxbarashada, ganacsiga, qoomiyahada, sharci dejinta, iyo ururada waalidka. Marka laga tago inay heli jirtay boqolaal fikir oo shacabka uga yimaad, kooxda hogaaminta OSPI (oo laba maamul soo jiray) waxay safar ku tageen dhammaan gobolka oo dhan, iyaga oo qabanaya dood goboleed iyo kulamo hoggaamiyayaasha bulshooyinka taariikhiyan aan si fiican wax loogu qaban.

Qorshahayaga ESSA waxa uu ka jawaabayaa galdaloolada fursadaha ee nidaamka waxbarashada, waxaanu ka shaqeeyaa u ololaynta in si siman ay u heli karaan fursadaha dhammaan ardayga Washington. Masuuliyadda anaka na saaran barayaal ahaan waa inaanu arday kasta u diyaarino -- iyada oo aan loo eegeynin taariikhdiisa, dhakhliga qoyskiisa, ama sinjigiisa -- himilooyinka, shaqooyinka, iyo nolosha dugsiga sare kadib. Taas macnaheeda oo ah in aanu si dhaw ula socono minqyaasyada kala duwan ee guusha ee dhammayska tiran ee ardayga oo ka baxsan imtixaanka caadiga ah: xaadirista caadiga ah (maqnaansho joogto ah), ku taagnaanta dhabbaha qallinjabinta ee fasalka sagaalaad, iyo fursadaha qaadashada koorsooyin sarreeya.

# Ku Saabsan Barnaamijyada Waxbarashada Federaalka

Barnaamijyada waxbarashada federaalku waxa ay siiyaan taakulo iyo dhaqaale hay'adaha deegaanka ee waxbarashada si ay wax ugu qabtaan ardayda khatarta ku jirta. Barnaamijyada waxaa lagu sheegaa cinwaan, waxaanu ka waramaa dhinacyo kala duwan ee nidaamkeena waxbarashada casriga ah. Waxaa kamid ah dhaqaale iyo tilmaamo lagu hormarinayo shaqada aasaasiga ah, bixin taakulo dheeraad ah oo ardayda ah, taakulayn tayada macallinka iyo maamulaha, taakulo barashada xirfada luuqadda Ingiriisiga, iyo hawlo hormarineed. Ardayda khatarta ku jirta, ha noqdeen qaar sabool ah, darbi-jiif, xabsi ha ku jiraan, muhaajiriin ha haadeen, ama xaalad kale ha ku jiraane waxay helaan taakulo dheeraad ah si ay u gaadhaan heer sare oo waxbarasho si ay u guulaystaan dugsiga iyo wixii ka danbeeya.

Barnaamijka federaalku waxa uu Qorshaha u habeeyay cutubyo:

A. **Cinwaanka I, Qaybta A: Horumarinta Shaqada Aas Aasiga ah ee Barnaamijka Hay'adaha Waxbarashada Deegaanka** waxay ka jawaabaysaa baahida gaarka ah ee carruurta -- laga bilaabo barbaarinta ilaa fasalka 12 -- kuwaas oo ay ku adkayd inay waxbartaan. Cinwaanka I, Qaybta A waxay sharraxaysaa nidaamka la xisaabtanka gobolka. Adeegyada taakulada ee qaybtan lagu sheegay waxay daaha ka faydaysaa fursadaha u diyaarka ah ardayda marka ay ka shaqaynayaan inay buuxiyaan heerkarka waxbarasho oo ay hawlo qabtaan, ay fuliyaan waxay xiisaynayaan barashada ee ay qaban karaan. Maadaama uu yahay barnaamijka waxbarashada ugu da'da wayn uguna balaadhan federaalka, barnaamijka Cinwaanka I, Qaybta A wuxuu ku dhisan yahay inay carruurtu u sinnaadaan fursadaha kuwaas lagdanka noloshu ku hayo inay waxbarashada bannaanka ka joogaan.

B. **Cinwaanka I, Qaybta C: Waxbarashada Carruurta Soo-Galaytiga** waxa uu ka kaalmeeyaa carruurta iyo dhalinyarada gobolkeena inay buuxiyaan loolamada heerka sare ee waxbarasho iyaga oo ka guulaysanaya caqabadaha ay ku keentay sida guur guuridda badan, kala goo go'a waxbarashada, kala duwanaanshaha dhaqanka iyo luuqadda, iyo mushkiladaha la xidhiidha caafimaadka.

C. **Cinwaanka I, Qaybta D: Barnaamijyada Ka-hortagga iyo Wax-ka-qabadka Carruurta iyo Dhalinyarada La Dayacay, Inay Dambi Galaan u Dhaw, ama Khatarta ku Jira** waxaa uu ka caawiyaa horumarinta adeegyada waxbarasho ee carruurta si ay u helaan fursad ay ku buuxinayaan loolamada waxbarashada Gobolka iyo heerarka kasbasho; waxa uu siiyaa adeegyada ay kaga gudbi lahaayeen hay'adaysiga oo ay u sii wadan lahaayeen waxbarashada ama shaqada; oo wuxuu ka caawiya dhalinta kahortagga kuwa khatarta ku jiraa inay waxbarashada joojiyaan, iyo in loo sahlo carruurta iyo dhalinyarada jeelasha kasoo baxday iyo kuwa waxbarashada joojiyay sidii ay u heli lahaayeen nidaam taakulo oo sugaya inay sii wataan waxbarashada.

D. **Cinwaanka II, Qaybta A: Taageeridda Waxbaris Wax-ku-ool ah** waxa uu kor u qaadaa guulaha waxbarasho ee dhammaan ardayda isaga oo ka caawinaya dugsiyada iyo degmooyinku inay horumariyaan tayada macallinka iyo maamulaha. Waxaa tan kamid ah diyaargarawga macallinka iyo aqoonta macallinka cusub, shaqaalaysiinta, dallicid, kobcinta xirfadle, iyo nagaanshaha. Sidoo kale, Cinwaanka II, Qaybta A waxaa dhici karta kaalmada dhaqaale in loo adeegsado sidii loo horumarin lahaa xirfadda iyo aqoonta maamulayaasha iyo madaxda kale ee dugsiga si loo heli maamul wax-ku-ool ah oo dugsiga ah.

E. **Cinwaanka III, Qaybta A: Barashada Luuqadda Ingiriisiga iyo Xoojinta Luuqadda** waxay ka jawaabaysaa baahida ardayda xaqa u leh ee ka soo jeeda meel luuqad iyo dhaqanba ka duwan inay kobciyaan aqoonta luuqadda taas oo u sahlaysa inay isticmaalaan si macne leh manhajka iyo waxbarista heerka fasalka.

F. **Cinwaanka IV, Qaybta A: Deeqaha Taageerada Ardayga iyo Xoojinta Waxbarashada** waxay siisaa dhammaan ardayda waxbarasho dhammaystiran oo ay kamid yihiin barnaamijyada sida la-talinta jaamacadda iyo shaqada, STEM, farshaxanka, xaqa iyo masuuliyadda muwaadinka iyo koorsooyin International Baccalaureate/Advanced Placement (Intarnashnaal Baakalooriyaat/Meelayn Sare ah)

International Baccalaureate/Advanced Placement. Waxay ka taakulaysaa ardayda inay helaan dugsi ka dhammaystiran caafimaadka maskaxda, kahortagga mukhaadaraadka iyo tacadiyada, waxbarashada caafimaadka iyo jidhka. Ugu danbayntii, wuxuu bixiyaa taakulo si wax-ka ku-ool ah sidii loogu adeegsan lahaa tiknooloojiyadda.

G. **Cinwaanka IV, Qaybta B: Xarumaha Barashada Bulshada Qarniga 21aad** waxay abuurtaa xarumo waxbarsho bulsho kuwaas oo bixiya fursado horumar waxbarasho wakhtiyada uu dusgigu fasaxa yahay inay helaan carruurtu, gaar ahaan ardayda dhigata dugsiyada dadka saboolka ah ku badan yihiin iyo kuwa waxqabadkoodu liito.
H. **Cinwaanka V, Qaybta B, Hormo-qaybeedka 2: Barnaamijka Dugsiyada Dadka Miyiga iyo Saboolka** waa barnaamij federaal ah oo loogu talogalay inuu ka jawaabo baahida gaar ah ee degmo dugsiyeedyada miyiga. Degmooyinkani badanaa waxaa ku yar shaqaalaha iyo khayraadka loo baahan yahay si ay ugu tartamaan deeqaha federaalka ee muuqda sida badana waxaa la siiyaa qayb yar oo loo qoondeeyey oo aan si wax-ku-ool ah loogu isticmaali karin ujeedooyinkooda laga lahaa.
I. **Cinwaanka VII, Hormo-qaybeedka B ee Xeerka Taakulaynta Derbi-jiifka McKinney Vento: Waxbarashada Barnaamijka Carruurta iyo Dhalinyarada Derbi-jiifka ah** waxa uu bixiyaa tabobar, kaalmo farsamo, iyo dabagal, sidoo kale kaalmada dhaqaale ee federaalka si loo kaalmeeyo barnaamijka degmo dugsiyeedyada ee u shaqeeya ardayda darbi-jiifka ah. Waxay sugtaa qoris isla markaaba ah iyo degganaanhso waxbarasho oo loogu talogalay carruurta iyo dhalinyarada derbi-jiifka ah.

# A. Cinwaanka I, Qaybta A: Horumarinta Barnaamijyada Aasaasiga ee Hay'adaha Waxbarashada Deegaanka

## Guudmar

Cinwaanka I, Qaybta A waxay ka hadlaysaa taakulada dhammaan ardayda la tacaalaya inay wax bartaan, waxayna ku dadaashaa inay ka jawaabto galdaloolada fursadda iyada oo bixinaysa kaalmo ku munaasab ah si loo sugo inay dhammaan ardaydu najaxaan.

### Qiimaynaha Afka Hooyo

OSPI waxay ku bixin qiimaynaha afka hooyo luuqadaha badanaa la isticmaalo gobolkeena marka la eego qiimaynaha gobolka oo dhan ah oo xisaabta iyo sayniska ah.

Xafiiska Waxbarashada Luuqadaha Badan ee OSPI waxa uu sanadkii warbixin u gudbiyaa Sharci-dejinta Gobolka Washington tirada ardayda ku hadasha luuqad aan Ingiriisi ahayn. Warbixintii sanadkii 2016, waxaa jiray 215 luuqadood oo aan Ingiriisi ahayn oo ay ku hadlaan 119,844 qof oo Ingiriisiga baranaya oo Washington jooga.

### Isla Xisaabtanka

OSPI waxay isku dheelitiri doontaa tabin sax ah oo dhammaystiran ee kooxo-hoosaadyada iyada oo ilaalinaysa sirta shakhsi ahaaneed ee ardayda iyo barayaasha. Washington waxay isku dari xogta saddex sano isla xisaabtanka dartiis, tirada ugu yar (wax ka badan saddex sano) ee ardayda la isku daray ee lagu dari doonaana waxay noqonaysaa 20.

Hadafka muddada dheer ee Washington ee dugsiga sare diiradda saari maayo tirada qalinjabinta dugsiyada oo dhan, balse waxay diiradda saari doontaa in la soo yareeyo farqiga u dhexeeya tirada qalinjabinaysa ee kooxo-hoosaadyada. Si tan loo gaadho, SEA waxa ay ku talisay in la sameeyo ugu yaraan boqolkii 90 tirada galinjabinta ee koox-hoosaadyada.

Gobolka waxa uu kordhin doonaa tirada boqolkiiba ee Ardayda Ingiriisiga barata kuwaas oo dhibco fiican ku helay qiimaynta Aqoonta Ingiriisiga oo kaga baxa adeegyada barnaamijka boqolkiiba hal sanad kasta saddexda sano ee soo socda. Hadafkan dib ayaa loo qiimayn doonaa waxaana loo samayn doonaa saddex sano oo kale marka loo doorto dugsiyada taakulaynta sidoo kalena aan xog badan oo aanu u sheegno ciddii bartilmaameedkayaga ahayd aanu helno.

*Shaxda 1. Guudmarka tilmaamaha iyada oo heerka fasalka lagu salaynayo.*

<table>
<tr><th>Heerka Fasalka</th><th colspan="3">Tilmaamaha Waxbarashada</th><th>Tilmaamaha Tayada Dugsiga ama Guusha Ardayga</th></tr>
<tr><td>Dugsiga Hoose</td><td rowspan="2">Qiimaynaha aqoonta gobolka oo dhan ee ELA iyo xisaabta</td><td rowspan="2">Horumarka waxbarasho marka lagu qiyaaso Korriinka Ardayga ee Boqolkiiba (SGPs) uu sameeyay</td><td rowspan="2">Horumarka Barashada Af Ingiriisiga</td><td rowspan="2">Maqnaansho Joogto ah</td></tr>
<tr><td>Dugsiga Dhexe</td></tr>
</table>

| Heerka Fasalka | Tilmaamaha Waxbarashada | | | Tilmaamaha Tayada Dugsiga ama Guusha Ardayga |
|---|---|---|---|---|
| Dugsiga Sare | Qiimaynaha aqoonta gobolka oo dhan ee ELA iyo xisaabta | Heerka Qalinjabinta | Horumarka Barashada Af Ingiriisiga | Maqnaansho Joogto ah |
| | | | | Ardayda Fasalka 9aad Sidii Loogu Talogalay Ayey u Socdaan |
| | | | | Qaadashada Koorsada Heerka Sare (laba dhibcood) |

Tilmaamaha guusha waxbarashada waxaa lagu qiyaasi doonaa qiimaynta aqoonaha fanka luuqadda Ingiriiska iyo xisaabta. Washington waxay u qaaddaa qiimaynaha Smarter Balanced si sanadle ah farshaxanka luuqadda Ingiriisiga iyo xisaabta fasallada 3-8 iyo marka dugsiga sare. Waxaa jira afar heer oo waxqabad waxaana ardayda loo tixgaliyaa inay gaadhaan heerka gobolka haddii ay helaan Heerka 3 ama 4, tilmaamaha guusha waxbarashadana waxa lagu sheegaa boqolkiiba inta arday ee gaadhay heerkaa.

Gobolka Washington waxa uu adeegsan doonaa tirada qalinjabinta guutada la habeeyey ee afarta sano marka la eego tilmaanta qalinjabinta dugsiga sare. Qaabka tirada qalinjabintu waxa uu raacaa tilmaamaha federaalka (NCLB Tirada Qalinjabinta Dugsiga Sare, Tilmaamaha Aanu Sharcigu Dhigin, Diseembar 22, 2008) waxaanu ku salaysan yahay marka ugu horreysa ee ardaygu galo fasalka sagaalaad, iyadoo lagu xisaabtamayo ardayga baddalka ku miyid ama dugsigu baddalka siiyay. Xaalada qalinjabinta ardayga waxaa loo nisbeeyaa dugsiga uu markii ugu danbaysay uu dhiganyey. Washington waxay isticmaalaysay qaabkan qalinjabinta ilaa 2010.

Iyada oo la qirayo in ardayda qaar muddo dheer u baahan yihiin si ay u qalinjabiyaan, qaabdhismeedka isla xisaabtanka (lagu sharraxay Firqadda 4v) waxaa kamid ah isku habayn kor ah ee dugsiyada ay arday badani ka qalinjabiyaan kuwa u baahan muddo ka badan inta caadiga ah inay kaga baxaan.

Washington waxay ka mid tahay urur sameeyay ELPA21, qiimayn cusub oo aqoonta Af Ingiriisiga ah oo afar qaybood ah (sida, akhris, qoris, dhageysi, iyo ku hadal) oo waafaqsan heerka caamka ah ee heerka aqoonta Af Ingiriisiga. Qiyaasta isla xisaabtanka waa boqolkiiba tirada ardayda horumarka wax-ku-oolka ah samaynaya ee barnaamijka kaga baxaya muddo lix sano ah.

Washington waxa ay ku dari doontaa saddex qiyaasood tayada dugsiga ama guusha ardayga: kasoo xaadirka fasalka ee joogtada ah, ardayda fasalka sagaalaad oo sidii loogu talogalay u socda, iyo qaadashada koorsada heerka sare. Qiyaasta kasta waxay martay gaadhsiin iyo dib-u-eegis ballaadhan ee daneeyayaasha. Waxay qayb ka yihiin nidaamka maamulka waxqabadka Washington si loo yareeyo galdaloolada fursadaha iyo kordhinta u sinnaanshaha nidaamka K-12 waxaana lagu baahiyay websaynta shicibka ee Washington.

Washington waxay adeegsan doontaa qaabka qiyaaso dhawr ah oo isku dhafan si ay u waddo horumarinta si ay si wax-ku-oo ah ugu kala saarto dugsiyada, iyadoo ku salaynaysa qiyaasta kor lagu sharraxay.

Dugsiyada Cinwaanka I, Qaybta A ee taageerada iyo horumarinta ballaadhan ee Washington waxay lagu aqoonsan doonaa iyada oo la adeegsanayo nidaamka qiyaasaha fara badan ee isku dhafan ee kor lagu

sharraxay, ama tirada qalinjabinta afar sano oo kayar boqolkiiba 67. Qiyaasaha waxaa mid kasta loo xisaabin doonaa iyada oo la adeegsanayo xogta isku dhafan ee saddex sano. Qaabka kala saaridda wax-ku-oolka ah ee dugsiyadu waxay isku dartaa dhawr tilmaame (mid kastaaba uu leeyahay dhibcaha 1-10) oo ay la socoto nidaamka miisaanka iyo dhibcaha u dhexeeya 1 ilaa 10 ee dugsi kastaa helay. Iyada oo la isticmaalayo xogtaas, boqolkiiba shanta waxqabadka ugu hooseeya ee dugsiyada Cinwaanka I, Qaybta A waxa loo garan doonaa taakulada ballaadhan, Washington-na waxay samayn doontaa horumar ay ugu talogashay boqolkiiba 5 -taas. Iyada oo la isticmaalayo qiyaas isku mid ah, dugsiyo kale ayaa heli doonaa taakulo bartilmaameed hadii mid ama wax kabadan oo qaybaha kooxaha ahi ay ku dhacaan wax ka hooseeya xudunta.

### Heerarka Helitaanka Barayaasha Oo Aan Sinnayn

Washington waxa haysta galdaloolyo xagga sinnaanta xagga helitaanka barayaasha wax-ku-oolka ah ee sare. Hormo-kooxeedyada ardayda qaarkood waxa wax uu dhiga heer aan loo sinnayn macallimiin aan wanaagsanayn, aan aqoon u lahayn, ama aan waayo-aragnimo lahayn.

OSPI waxay soo dhigtay dhawr khidadood oo lagaga jawaabayo galdaloolada sinnaan la'aanta. Fadlan eeg khiddadaha lagu sheegay Qorshaha Sinnaanta wixii sharrax dheeraad ah ee waxa dhaliyay iyo qorshaha OSPI si looga jawaabo u sinnaanshaha helitaanka barayaasha.

### Xaaladaha Dugsiga

Nidaamka waxbarashada Gobolka waxa si xoogan uga go'an sidii loo yarayn lahaa dhacdooyinka tacadiyada, cagajuglaynta, iyo cawaandadda; iyo sidii loogu samayn lahaa jawi dugsi oo wanaagsan ardayda oo dhan. Gobolku waxa uu qaaday dhawr tallaabo oo muhiim ah si uu u wanaajiyo xaaladaha dugsiga:

- Waxa uu xaduuud u dhigay ku-camalfallada anshaxa ee ka saaridda wuxuuna siiyey xuquuqda cadaaladda ardayda oo dheeraad ah (ESSB 5946);
- Waxa uu abuuray Waaxda Anshaxa si ay u sameeyaan xog ururin oo ay u dejiyaan xuduudo;
- Taas oo ay kamid tahay habdhaqanka gudaha adeegyada la oggol yahay ee LAP;
- Waxa uu abuuray fursado waxbarasho xirfadle oo kale oo loogu talogalay shaqaalaha degmooyinka;
- Wuxuu sameeyey nidaamyo taageero oo lakabyo badan (sida, waxbarashada, bulshada, dareenka, maskaxda, habdhaqanka, iyo jidhka) si uu sare ugu qaado natiijooyin waxbarasho oo sidii hore dhaama in helo.

## Sidoo kale fiiri


- Qiimaynta iyo Tijaabinta
- La Socoshada Galdaloolka Fursadda Waxbarasho iyo Isla Xisaabtanka
- Agabka Qalinjabinta
- Kaadhka Warbixinta Gobolka Washington
- Qorshaha Sinnaanta
- Tixraaca Habdhaqanka ee Ku-camalfallada iyo Khiddadaha ugu Wanaagsan

# B. Cinwaanka I, Qaybta C: Waxbarashada Carruurta Soo-Galaytiga

## Guudmar

OSPI waxay siisaa tilmaamo degmooyinka si ay u qiimeeyaan baahiyaha ardayda soo-galaytiga ah iyagoo u maraya Barnaamijka Waxbarashada Soo-Galaytiga. Baahiyaha gaarka ah ee waxbarasho waxaa kamid noqon kara u diyaar garawga barbaarinta kahor, iyo taakulada dhalinyarada waxbarashada joojisay, oo ay kamid tahay barnaamij waxbarasho oo kale.

**Ujeedooyinka Barnaamijka ee La Qiyaasi Karo:**

- In kor loo qaado boqolkiiba tirada ardayda soo-galaytiga ah ee helaysa dhibcaha aqoonta ama wax ka sarreeya fanka luuqadda Ingiriiska (Akhriska).
- In kor loo qaado boqolkiiba tirada ardayda soo-galaytiga ah ee helaysa dhibcaha aqoonta ama wax ka sarreeya xisaabta.
- In kor loo qaado boqolkiiba tirada Mudnaanta Adeega (PFS) ardayda soo-galaytiga ah kuwaas oo ka qalinjabiyay dugsiga sare marka la barbar dhigo ardayda aan ahayn soo-galaytiga PFS.
- In la isbarbardhigo natiijooyinka imtixaanka ugu cusub ee Aqoonta Luuqadda Ingiriisiga (ELPA21, oo la qaaday gu'gii 2016) si loogu sameeyo bar looga qiyaas qaato ardayda soo galaytiga ah korriinkooda, PFS ah iyo kuwaan PFS ahayn.

Barnaamijka Waxbarashada Soo-Galaytiga Cinwaanka I, Qaybta C ee Gobolka (MEP) waxa uu mudnaan kala siiyay isticmaalka taakulada dhaqaale isaga oo ugu salaynaya Qiimayntii Baahida Dhammayskatiran ee la sameeyay dhawaan iyo Qorshaha Gaadhsiinta Adeegga Gobolka sida soo socota:

- Guulaha Waxbarasho ee Fanka Luuqadda Ingiriiska (ELA) iyo Xisaabta
- U-diyaarsanaanta Dugsiga/Kahor Dugsiga
- Qalinjabinta
- Taakulada Caafimaadka
- Aqoonsiga iyo Shaqaalaysiinta
- Kala-Shaqaynta Waalidka/Kaqaybgalka

## Sidoo kale fiiri

- Xafiiska Waxbarashada Soo-Galaytiga iyo Luuqadaha Badan
- Waxbarashada iyo Khayraadka Laba Luuqadood
- Xuquuqda Ardayda Soo-Galaytiga ah

# C. Cinwaanka I, Qaybta D: Barnaamijyada Kahortagga iyo Wax-ka-qabadka ee Carruurta iyo Dadka Yaryar ee La Dayacay, Inay Dambi Galaan u Dhaw, ama Khatar Ku Jira

## Guudmar

Washington waxay samayn doontaa qorshe ay ku sugayso in dhammaan carruurta iyo dhalinyaraduba ay si guul ah uga gudbaan hal jeelasha carruureed gudbaan jeel carruureed kale ama ay u gudbaan barnaamijka dugsiga deegaan. Marka la gaadho dayrta 2017, OSPI waxay la shaqayn doontaa koox wakiilo u ah degmo dugsiyeedyada ee dusgiyada jeelasha carruurta si ay ugu sameeyaan tilmaamo dhammaan LEAs-ka u adeegaya caddaaladda carruurta. Tilmaamahaasi iyaga oo jira, degmo kasta waxaa looga baahan inay samaysato qorshe deegaankeeda ah oo dhalinyaradu ay iskaga gudbayaan jeelka carruurta iyo barnaamijka waxbarashada deegaanka.

### Hormo-qaybeedka 1 Ujeedooyinka iyo Natiijooyinka Barnaamijka

- Si ay uga jawaabto horumarinta heerarka fasalka waxbarashada ee xisaabta & akhriska: Boqolkiiba 50 ama wax ka badan ayaa ardayda Heshay taakulada dhaqaale ee koorsooyinka akhriska iyo/ama xisaabta waxay samayn doonaan horumar ugu yaraan hal fasal ah aagga ay heleen adeegyada taakulada ee fasalka 90 maalmood kadib.
- Si looga jawaabo kor u kaca guusha dhicbaha dugsiga sare: Ardaydu waxay ku heli doonaan dhibco aan ka yaran .1 dhibic fasal kasta oo 15 saacadood ah oo ay dhigtaan ugu yaraan boqolkiiba 80 dhammaan fasalada.
- In laga jawaabo kor u kaca galidda dugsiga marka laga baxo: Ugu yaraan boqolkiiba 50 ardayda dhigata 90 maalmood ama wax ka badan waxay gali doonaan ama barnaamijka dibloomada dugsiga sare, ama fasalada diyaargarawga GED, ama waxay dib u gali doonaan barnaamij waxbarasho ilaa la sii daynayo.

### Hormo-qaybeedka 2 Ujeedooyinka iyo Natiijooyinka Barnaamijka

- Si ay uga jawaabto horumarinta heerarka fasalka waxbarashada ee xisaabta & akhriska: Ugu yaraan boqolkiiba 50 ardayda dhigata barnaamijka dugsiga 30 maalmood oo dugsi ama wax ka badan waxay kor u qaadi doonaan natiijadooda akhriska iyo/ama xisaabta ugu yaraan heer hal fasal ah ama kabadan.
- Si looga jawaabo kor u kaca guusha dhicbaha dugsiga sare: Boqolkiiba 100 ardayda dhigata ee dhammaynaa shaqada dugsiga 10+ maalmood oo xidhiidh ah waxay heli doonaan dhibcaha saacadaha ama saacadaha fadhiga ee dugsiga.
- In laga jawaabo kor u kaca galidda dugsiga marka laga baxo: Ugu yaraan boqolkiiba 50 ardayda la soo daayay waxay galayaan barnaamijyo waxbarasho oo bulshada ah 30 maalmood gudahood marka laga soo daayo jeelka.

## Sidoo kale fiiri

- Waxbarashada Jeelka
- Khayraadka Waxbarashada Jeelka

# D. Cinwaanka II, Qaybta A: Taageeridda Waxbaris Wax-ku-ool ah

## Guudmar

Horumarinta Tayada Macallinka iyo Maamulaha waxay kor u qaaddaa guusha waxbarasho ee dhammaan ardayda. Taakulada maaliyadda Cinwaanka II, Qaybta A waxay siisaa diyaargarawga macallinka iyo aqoon macallinka cusub, shaqaalaysiinta, dallicid, horumarin xirfadle, iyo ku nagaansho. Washington waxay leedahay galdalool sinnaaneed oo xidhiidha helidda macalimiin aqoon baan, waxayna ka shaqaynaysaa sidii ay uga jawaabi lahayd arrintaa iyadoo u maraysa Mashruuca Helitaanka U Sinnaanta Macallimiinta Fiican ee gobolka.

Ilaa boqolkiiba afartan xaddiga qaybta taakulada dhaqaalaha ee loo dhigay hay'adaha waxbarshada deegaanka (celcelis ahaan $1.4 milyan) ayaa loo adeegsan karaa si loogu taakuleeyo macallimiinta, maamulayaasha iyo maamulada kale ee dugsiyada. Koox Shaqeedka Baraha Wax-ku-oolka ahi waxay ku talinaysaa inuu gobolku mudnaan u siiyo taakulaynta dhaqaale kor u qaadidda xirfadda maamulaha. Taakulo dhaqaale oo yar ayaa u diyaar ah amaba maba jirto mid loogu talogalay tabobarka maamulayaasha, gobolkuna waxa uu aad u maalgaliyay kobcinta xirfadda macallinka. Mudnaanta kobcinta maamuluhu waa tabobar kusaabsan qiimaynta macallinka iyo maamulaha. OSPI waxay ku talo jirtaa inay dabacsanaantaa sii waddo mustaqbalka si ay u maalgaliso waxbarashada xirfadle ee mashaariicda gobolka iyo federaalka oo maamulayaasha ku lug leh. Shayga ugu muhiimsan taageeridda waxbaris wax-ku-ool ah waa in la xoojiyo xirfadaha barayaasha iyo maamulayaasha ka shaqaynaya baahiyaha waxbarashada ardayga.

Sidoo kale, maalgalinta waxaa qayb loo astayn doonaa taakulaynta waxbarista wax-ku-oolka ah ee lagu bartilmaameedsanayo shaqaalaysiinta iyo sii haynta macallimiinta wax-ku-oolka ah, maamulayaasha, iyo maamulada kale ee dugsiyada, kobcinta xirfadle ee caddaynta kusalaysan ee macallimiinta wax-ku-oolka ah iyo tabobarka iyo taakulaynta kooxaha hoggaaminta waxbariseed.

Ardayda oo dhan waxay u qalmaan helitaanka macallimiin wax-ku-ool ah. Hormo-kooxeedyada ardayda qaarkood waxa wax uu dhiga si aan loo sinnayn macallimiin aan wanaagsanayn, aan aqoon u lahayn, ama aan waayo-aragnimo lahayn. OSPI waxay bilawday falanqayn gunta ka soo bilaabantay si ay u aqoonsato una bilawdo xallinta dhibaatooyinkan. Falanqaynta gunta ka soo bilaabantay waxay isticmaashaa qaabdhismeed waafaqsan sii socoshada shaqada ee macallimiinta si loo aqoonsado dhibaatooyinka saamaynaya helitaan loo siman yahay ee macallimiin wax-ku-ool ah, sida sare ku cad. Waxa ugu wayn ee keenay waa la'aanta maalgalin loo siman yahay degmooyinka oo dhan marka la eego shaqaalaynta macallimiin wax-ku-ool ah. Ahaanshaha tallaabada koowaad ee horumarinta helitaanka, OSPI waxay soosaari oo si sannadle ahna u cusboonaysiin xogta la xidhiidha heerarka iyo sinnaan la'aanta.

OSPI waxay abuurtay Koox-Shaqeedka Kobcinta Shaqaalaha Macallimiinta si loo soosaaro siyaasad iyo hindisayaal maalgalin ugana dhiibato aragti fulinta Qorshaha Caddaaladda, qaynuunka yaraanta macallimiinta oo dhawayd iyo hindisayaal heer gobol oo kale si ay u kordhiso macallimiinta Washington.

ESSA waxay u baahan tahay in kaaliyayaasha macallimiinta Cinwaanka I, Qaybta A oo dhan ay buuxiyaan shahaadada gobolka iyo shuruudaha shatiga. Washington hadda ma laha shuruudaha shahaadada shatiga marka la eego kaaliyayaasha mutacallimiinta. In kastoo sharci-dejinta Washington oggolaatay Koox Shaqeed Kaaliyayaasha Macallimiinta inay talooyin ka bixiso heerarka, may noqon mid la qaatay. Tan darteed, OSPI waxay joogtayn doontaa aqoonta kaaliyayaasha macallimiinta ee la rabo iyadoo la raacayo Ilmana Waa Inaan La Dhaafin (NCLB) ilaa la gaadho wakhti Heerarka Kaaliyayaasha Macallimiinta la qaato oo ay Sharci-dejintuna maalgaliso.

Shaxda hoose waxay iftiiminaysaa qeexdimaha iyo shuruudaha OSPI ay isticmaali doonto bixinta xogta macallimiinta aan wax-ku-ool ahayn, aqoon u lahayn shaqadan, ama aan waayo-aragnimo lahayn.

| Tibaaxda Muhiimka ah | Qeexdinta Gobolka oo Dhan ama Tilmaamaha Gobolka oo Dhan |
|---|---|
| Macallin Wax-ku-ool ah | Macallimiinta iyo maamulaayasha leh kabadan 3 sano oo waayo-aragnimo ah waxa loo aqoonsan inay yihiin qaar wax-ku-ool ah haddii ay ka helaan buundooyinka wadareed ee soo socda TPEP:<br><br>4-Dad iskuma jiro ah (Distinguished)<br>3-Ku-fiicnaansho ah (Proficient) |
| Macallinka Wax-ku-oolka ee Soo Baxaya | Macallinka iyo maamulaayasha waxa loo aqoonsan shaqo xilli hore oo soo socota laga bilaabo* sanadada 0-3 ee shaqadooda haddii ay ka helaan “2” TPEP-ka. Waxa loo aqoonsadaa wax-ku-ool ah oo leh buundo 3 ama 4 ah.<br><br>Haddii wax kamid ah maalgalinta federaalka iyo gobolka loo qoondeeyo in lagu bartilmaameedsado macallimiinta aan wax-ku-oolka ahayn, macallimiinta qaybta wax-ku-oolka shaqada wakhtiga hore ee soo socda ayaa u qalmi shaqada la xidhiidha waxbarashada xirfadle. |
| Macallin Aan Wax-ku-ool Ahayn | Macallinka iyo maamulayaasha waxa loo aqoonsan inayna wax-ku-ool ahayn haddii:<br><br>Kabadan 3 sano oo waayo-aragnimo ah:<br>2-Aasaasi (Basic)<br>1-Aasaasi ka Hooseeya (Below Basic)<br>0-3 sano oo waayo-aragnimo ah:<br>1-Aasaasi ka Hooseeya (Below Basic) |
| Macallin Waxbarashadiisa ka Baxsan | Macallin loo dhiibay inuu dhigo maaddo tacliin ahaan muhiim ah laakiin aan isaga si fiican loogu tabobarin maaddadan uu dhigayo. |
| Macallin Aan Waayo-aragnimo Lahayn | Macalimiinta leh in kayar ama la mid ah waayo-aragnimo waxbaris oo ah shan sano. |

Washington waxay adeegsataa nidaam qiimayn iyo taakulayn oo loogu talogalay macalimiinta iyo maamulayaasha, Barnaamijka Qiimaynta Macalinka iyo Maamulaha, (TPEP). TPEP waa natiijada ka dhalatay wada shaqayn OSPI, Ururka Waxbarashada Washington, Ururka Maamulayaasha Dugsiyada Washington, Ururka Maareeyayaasha Dugsiyada Washington, Ururta Waalidiinta iyo Macallimiinta Gobolka Washington (PTA), iyo Ururka Agaasimayaasha Dugsiyada Gobolka Washington.

TPEP waxay adeegsataa u kuurgal too ah, qiyaasta koboca ardayga, iyo caddaymo kale si ay u qiimayso xirfadda shaqaalaha.

Degmo dugsiyeedyada waxay adeegsan karaan mid kamid ah saddexda Halbeeg: Qaabdhismeedka loogu talogalay Macallinka, 5D+ Halbeegga Qiimaynta Macallinka, ama Nidaamka Qiimaynta Macallinka ee Marzano. Qaabdhismeedka kasta waxaa isticmaala ku dhawaad saddex meelood oo meel 295 degmo dugsiyeedyada oo ku yaal Washington.

Mid kasta oo kamid ah qaabdhismeedyadan saddexdaah; marka la hirgaliyo, natiijadiisa darajeynta baruhu waa:

1. Aan lagu qancin (Unsatisfactory)
2. Aasaasi ah (Basic)
3. Aqoon fiican (Proficient)
4. Heer Sarreeya (Distinguished)

Macalimiinta ku-meelgaadhka ah, oo saddex ama dhawr sano oo khibrad ah leh waxay maraan qiimayn dhammaystiran sanad walba, kadibna afar sano oo kasta intaa wixii ka dambeeya.

Maamulayaasha waxaa lagu qiimeeyaa Qaabdhismeedka Hoggaanka Maamulka Gobolka Washington, ama Nidaamka Qiimaynta Hoggaanka Dugsiyada ee Marzano.

OSPI waxay ka hirgalinaysaa isbaddalo dhawr ah TPEP. Degmooyinku waxay dooran karaan inay hirgaliyaan isbaddalka sanad dugsiyeedka 2016-17 ama 2017-18. Dhibcaha qiimayntii ugu danbaysay ee Dhammaystirnaynd waxay hore loogu sii qaadan doonaa qiimaynta Diiradda lagu hayo. Tani waxay dhiirigalin doontaa macallimiinta iyo maamulayaasha si ay uga jawaabaan aagagga ay caqabadaha kala kulmaan muddada hannaanka qiimaynta Diiradda la saaray. U kuurgalid, taas oo qayb laxaad leh ka ah hannaanka, waxaa lagu soo daray hawlo ka qabsoomaya meelo ka baxsan fasalka ama maalmaha dugsiga.

## Sidoo Kale Fiiri

- Tayada Macallinka iyo Maamulaha
- Shahaadada Gobolka Washington
- Sugida Gobolka washington ee Helitaanka Loo Siman Yahay ee Qorshaha Gobolka Mashruuca Macallimiinta Wanaagsan (Qorshaha Sinnaanta)
- Barnaamijka Qiimaynta Macallinka/Maamulaha (TPEP)
- Samaynta Koox Taakulo oo Macallinka ah
- Jidadka Macallinka Guddida Heerarka Baraha Xirfadle
- Shuruudaha Kaaliyaha Macallinka

# E. Cinwaanka III, Qaybta A, Hormo-qaybeedka 1: Barashada Luuqadda Ingiriisiga ah iyo Hormarinta Luuqadda

## Guudmar

Cinwaanka III, Qaybta A waxay ka jawaabaysaa baahiyaha gaarka ah ee ardayda xaqa u leh ee kasoo jeedaa meel luuqad iyo dhaqanba ka duwan si loo kobciyo luuqaddooda taas oo u sahlaysa inay si macne leh u isticmaalaan manhajka heerka fasalka iyo waxbarista.

Ardayda waxa loo aqoonsadaa bartayaal Ingiriisi iyadoo lagu salaynayo xogururin luuqadda gurigooda looga hadlo iyo buundadooda qiimeeyayaasha ku-fiicnaanta luuqadda Ingiriisiga ee gobolka ansixiyey, ELPA21 (laga bilaabo dayrta 2017). Qiimeeyuhu waxa uu eegi doonaa qaybaha luuqadda ee akhriska, qorista, dhegaysiga, iyo ku hadalka. Degmooyinku waxa looga baahan yahay inay ku sameeyaan qiimeeyahaha 10 maalmood gudahood laga bilaabo galitaanka. Ardayda ay ka hoosayso dhibcahoodu intii loogu talogalay ama intii lagu gudbi jiray waxay xaq u leeyihiin adeegyada kobcinta luuqadda Ingiriisiga.

Ardayda baranaya Ingiriisiga waxa lagu imtixaamaa imtixaamka ELPA21 si sanadle ah, ama ELPA21 iyada oo waajajino loo diyaarinayo ardayda naafada xagga garashada leh ee baranaya Ingiriisiga.

Ardayda waxaa lagu qiimeeyaa mid Soo Baxaya, Horumaraya, ama Aqoon Fiican leh (Proficient), taas oo ku salaysan natiijooyinka qiimayntooda. Ardayda leh go'aan Soo Baxaya ama Horumaraya waxay sii wadi inay helaan adeegyada kobcinta luuqadda Ingiriisiga, halka ardayda ku-fiicani ayna mar dambe helin doonin adeegyada kobcinta luuqadda.

Laba sano kabacdi markay ardaydu ka baxaan adeegyada kobcinta luuqadda Ingiriisiga, degmooyinku waxay gobolka ka helaan taakulo dhaqaale oo dheeraad ah si loola socdo horumarka waxbarasho loona siiyo taakulo waxbarasho haddii ay ka hooseeyaan heerka fasalka ama ayna gaadhin heerka fanka luuqadda Ingiriisiga, xisaabta ama sayniska ee sanadkii.

SEA waxa uu ka taakulayn doonaa LEAs inuu gaadho heerka waxbarashada gobolka ee loolanka leh isaga oo ku bixinaya qiimaynaha waxbarasho ee loo baahnaa luuqadda hooyo ilaa xadka dhammaystiran ee uu oggol yahay ESSA Cinwaanka I, Qaybta A.

SEA waxa uu sidoo kale taakulo toos ah iyo taakulo muuqaal oo farsamo ku kaalmayn doonaa LEAs si loo kala hufo siyaasadaha iyo ku-camalfallada kordhinaya guusha waxbasho ee EL iyo aqoonta luuqadda Ingiriisiga. Marka laga tago taakulada farsamo ee tooska ah ee LEAs ay taleefanka, iimeelka iyo kulamo maqal iyo muqaal ah ku helayso, shaqaalaha SEA waxay bixin doonaan shaqo barasho oo qofku xaadir yahay iyo hawlo barasho onlayn ah oo xirfadle iyo agabka webka kusalaysan oo kusaabsan sida ka taakulaynta ELs-ka halgamaya waxbarista laf dhabarta u ah, ka jawaabidda baahiyaha gaarka ah ee qofka cusub, in la iska ilaaliyo sinnaanta la'aanta waxbarashada gaarka ah iyo dhisidda barnaamijyada labada luuqadood ee loogu talogalay ELs.

## Sidoo Kale Fiiri

- Barnaamijka Soo-Galaytiga iyo Waxbarashada Luuqadaha Badan
- Heerarka Aqoonta Luuqadda Ingiriisiga
- Waxbarashada iyo Khayraadka Laba Luuqadood
- Xuquuqda Ardayda Soo-Galaytiga ah

# F. Cinwaanka IV, Qaybta A: Deeqaha Taageerada Ardayda iyo Xoojinta Waxbarashada

## Guudmar

Deeqaha Taageerada Ardayda iyo Xoojinta Waxbarashada waxay siisaa dhammaan ardayda waxbarasho dhammaystiran oo ay kamid yihiin barnaamijyada sida la-talinta kuuliyadda iyo shaqada, Sayniska, Teknooloojiyadda, Ingineerinka, iyo Xisaabta (STEM), farshaxan, xaqa iyo masuuliyadda muwaadinka iyo koorsooyin Intarnashnaal Baakalooriyaat/Meelayn Sare ah. Waxay ka taakulaysaa ardayda inay helaan dugsi ka dhammaystiran caafimaadka maskaxda, kahortagga mukhaadaraadka iyo tacadiyada, waxbarashada caafimaadka iyo jidhka. Ugu danbayntii, wuxuu bixiyaa taakulo si wax-ka ku-ool ah sidii loogu adeegsan lahaa tiknooloojiyadda.

Washington waxay isticmaali doontaa taakulada dhaqaale ee heerka gobolka marka la eego qaybtan si ay u bixiso dabagal, taakulo farsamo, iyo awood dhisid degmooyinka ah si ay u hantaan hadafka barnaamijka.

Washington waxay isticmaali doontaa taakulada dhaqaale ee Cinwaanka VI, Qaybta A, Hormo-qaybeedka1 si ay ugu siiso qoondooyin mid kasta oo LEA kamid ah sida soo socota:

- In la xisaabiyo boqolkiiba taakulada dhaqaale ee ay ku hesho mid kasta oo kamid ah LEA xaddiga ay ku heshay hormo-qaybeedka 2 ee Cinwaanka I, Qaybta A ee sanadkii ka horeeyay.
- In la sugo inaanu LEA-na qaadan qoondo kayar $10,000.
- Haddii qoondo LEA ah ay kayar tahay $10,000, OSPI si macquul ah ayay hoos ugu dhigi doontaa sida ay dhigayso Firqadda 4105(b) ee ESSA.

## Sidoo Kale Fiiri

- Waxbarashada STEM ee Washington
- Teknooloojiyadda Waxbarashada
- Barnaamijka Meeleynta Sare/Intarnashnaal Baakalooriyaat

# G. Cinwaanka IV, Qaybta B: Xarumaha Barashada Bulshada Qarniga 21aad

## Guudmar

Ujeedada Barnaamijka Xarumaha Barashada Bulshada Qarniga 21aad waa inay siiyaan fursado bulshada si ay u sameeyaan ama u ballaadhiyaan hawlaha kuwaas oo—

- Bixiya fursado horumarinta waxbarashada, oo ay kamid yihiin siinta adeegyada u marinta casharada ardayda, gaar ahaan ardayda xaadirta dugsiga liita xagga waxbarashada, si ay u gaadhaan heerarka waxbarashada Gobolka ee loolanka leh saacadaha dugsigu fasaxa yahay;
- Siiya ardayda adeegyo, barnaamijyo, iyo hawlo kale oo dheeraad ah, sida hawlaha kobcinta dhalinyarada, barashada adeegyada, waxbarashada nafaqada iyo caafimaadka, barnaamijyada kahortagga mukhaadaraadka iyo tacaddiyada, barnaamijyada la-talinta, farshaxanka, muusiga, jimicsiga iyo barnaamijyda badqabka, barnaamijyada waxbarashada teknoolojiyadda, barnaamijyada barashada dhaqaalaha, barnaamijyada barashada daryeelka deegaanka, xisaabta, sayniska, barnaamijyada shaqada iyo farsamada, barnaamijyada tabobarka shaqada, iyo isku xidhka kale ee shaqooyinka iyo fursadaha suuqa ka bannaan ee loogu talogalay ardayda dugsiga sare kuwaas oo loogu talogalay inay xoojiyaan oo ay kaabaan barnaamijka waxbarashada caadiga ah ee ardayda kaqaybgalaya; iyo
- Siiya qoysaska ardayda ay u shaqayso xarunta barashada bulshadu fursado ah inay si joogto ah oo wax-ku-ool ah uga mid noqdaan waxbarashada carruurtooda, oo ay kamid yihiin fursadaha kobcinta qorista/akhriska iyo waxbarashada la xidhiidha.

OSPI waxa uu u isticmaali boqolkiiba saddex iyo sagaashan (boqolkiiba 93) taakulada dhaqaale loo asteeyey Cinwaanka IV, Qaybta B inuu abaal marin u siiyo deeqaha tartami og ee CCLC 21aad si ay u gaadhaan ujeeddada barnaamijka.

Barnaamijyaa waxa looga fadhiyaa inay bixiyaan hawlaha kuwaas oo:

1. La bixiyo saacadaha uu fasaxa yahay dugsigu ama xiisadaha ayna fasal lahayn
2. Xoojiya oo kaaba barnaamijyada waxbarasho ee caadiga ah ee ay dhigtaan ardayda loo adeegaa
3. Waafaqsan heerarka waxbarashada Gobolka ee loolanka leh
4. Bartilmaameedsanaya baahiyaha waxbarasho ee ardayda oo waafaqsana waxbarista ay helaan ardaydu maalmaha waxbarashada

OSPI waxa uu u adeegsan doonaa maamulka barnaamijka ilaa boqolkiiba laba dhaqaalaha, iyo boqolkiiba shan hawlaha heerka gobol, oo ay kamid yihiin dabagalka iyo qiimaynta, awood dhisidda, tabobarka, kaalmada farsamo, isku dubbaridka, iyo kaqaybgalka bulshada.

## Sidoo Kale Fiiri

- Xarumaha Barashada Bulshada Qarniga 21aad ee Washington

# H. Cinwaanka V, Qaybta B, Hormo-qaybeedka 2: Barnaamijka Dugsiyada Dadka Miyiga iyo Saboolka

## Guudmar

Cinwaanka V, Qaybta B waa barnaamij federaal ah oo loogu talogalay inuu ka jawaabo baahiyaha gaar ah ee degmo dugsiyeedyada miyiga. Degmooyinkani badanaa waxaa ku yar shaqaalaha iyo khayraadka loo baahan yahay si ay ugu tartamaan deeqaha federaalka ee muuqda sida badana waxaa la siiyaa qayb yar oo loo qoondeeyey oo aan si wax-ku-ool ah loogu isticmaali karin ujeedooyinkooda laga lahaa.

OSPI waxay u adeegsan doontaa deeqaha barnaamijka ee Dugsiyada Miyiga iyo Saboolka (RLIS) si ay uga kaalmayso degmooyinka miyiga inay u isticmaalaan khayraadka federaalka si wax-ku-ool ah si ay u taakuleeyaan dhammaan ardayda ugana jawaabaan galdaloolada ardayda aanu nidaamkeena waxbarasho hore si fiican ugu adeegin. LEAs-ka mutaystay waxa ay aqoonsan doonaan baahiyaha gaarka ah ee taakkuladan dhaqaalaha lagu bixin doono waxaanu keeni doonaa qorshe lagu ururinayo oo warbixin lagaga diyaarinayo xogta si loo qiimeeyo horumarka ujeedoyinka iyo natiijooyinka la doortay.

Taakulada farsamo ee LEAs-ka mutaytay waxa lagu bixin doonaa qaab joogto ah kaqayb ahaan maamulka deeqda caadiga ah, oo ay kamid yihiin wargelinaha LEAs ee khusaysa shuruudaha arjiga, muddada, isbaddalka mutaysiga, taakulada loogu talogalay laba jeer mutaysiga Guusha Dugsiga Miyiga Oo Yar (SRSA)/deeqaha RLIS, iyo gaadhista LEAs oo ka faa'idi karta tilmaamaha isticmaalada la oggol yahay ee dhaqaalaha iyo ku-camalfallada casriyeyneed/ugu wanaagsan.

Kaqaybgalka joogtada ah ee Washington ee shabakadda Casriyeynta Miyiga iyo Kaqaybgalka Ardayga ee Waqooyigalbeed (NW RISE) waxay bixisaa kobciye ku-camalfallo macne leh si ay sare ugu qaaddo kaqaybgalka ardayda oo u taageerto guusha dhammaan ardayda, taas oo ku munaasab ah badi miyiga iyo LEAs-ka fog iyo kuwa leh mutaysiga RLIS.

Hannaanka Qiimaynta Barnaamijka Isku Dhafan ee Gobolku wuxuu u aqoonsadaa LEAs-ka yar, miyiga ah ee saboolka ah inuu ka faa’idi karo qiimaynaha kuwaas oo lagu cabbiro oo lagu sameeyo fahanka loolamada maamuleed ee LEAs la kulanto. OSPI waxay ku shaqaysaa nidaam kaalmo farsamo dhammaan qiimaynaha oo si gaar ah ugu bartilmaameedsato LEAs yar ee miyiga hannaanyada la beddelay lana cabbiray ee dabagalka hele-hoosaadka.

## Sidoo Kale Fiiri

- Barnaamijka Dugsiyada Dadka Miyiga iyo Saboolka
- Barnaamijka Guusha Waxbarashada Miyiga

# I. Waxbarashada Barnaamijka Carruurta iyo Dhalinyarada Derbi-jiifka ah, Xeerka Kaalmada Derbi-jiifka McKinney-Vento, Cinwaanka VII, Qayb-hoosaadda B

## Guudmarka

Cinwaanka VII, Qaybta B waxa uu bixiyaa tabobar, kaalmo farsamo, iyo dabagal, sidoo kale kaalmada dhaqaale oo federaalka si loo kaalmeeyo barnaamijyada degmo dugsiyeedyada ee u shaqeeya ardayda darbi-jiifka ah. Waxay sugtaa qoris isla markaaba ah iyo degganaanhso waxbarasho oo loogu talogalay carruurta iyo dhalinyarada derbi-jiifka ah.




Si loo fududeeyo aqoonsiga carruurta iyo dhalinyarada darbi-jiifnimadu haysato, su'aalo guryeynta ah ayaa sanadkiiba mar la siiyaa waalidka ilmo kasta, iyo qof kasta oo dhalinyaro ah oo kali ah, degmo kasta. Qaybinta su'aalaha guryeyntu waxay ku beegan tahay sanad dugsiyeed kasta bilawgiisa, sidoo kale ardayga cusub ee kusoo biira degmada sanad dugsiyeedkaas. OSPI waxay bixisaa muunad qaabka ah, oo lagu turjumay luuqado badan, si ay u hirgaliyaan degmo dugsiyeedyadu oo ay u waafajiyaan degmadooda. Kusoo biiridda ardayga iyo siinta adeegyada taakuladu isla markaba marka ardaygu kusoo biiro waa inay dhacaan si loo sugo taxadirka wakhtiga ku habboon baahiyaha ardayda ay haysato xaalad derbi-jiifnimo ahi.

Degmo dugsiyeed kastaa ee gobolka ku taalaa waxaa lagu dabagalaa barnaamijka federaalka ee OSPI hannaanka Qiimaynta Barnaamijka Isku Dhafan (CPR). Tilmaamayaasha dabagalka waxaa kamid ah u hoggaansanaanta tabobarka xidhiidhiyaha, aqoonsiga iyo kusoo biiridda ardayda derbi-jiifka ah, isticmaalka su'aalaha guryeynta si ay uga kaalmeeyaan aqoonsiga, iyo shuruudaha kale ee McKinney-Vento.

OSPI waxay siisaa tabobar joogto ah oo ballaadhan dhamaan LEAs-ka marka la eego shaqooyinka degmada saaran, oo ay kujiraan shuruudaha la xidhiidha aqoonsiga dhakhsaha ah iyo qorista carruurta darbi-jiifka ah iyo dhallinyarada, isticmaalka su'aalaha qoran ee guryeynta iyo foomamka qaadashada, siinta dhammaan adeegyada iyo taageerooyinka daruuriga u ah guulaysiga waxbarasho ee dugsiga, iyo shardiga ururinta iyo tabinta xogta ee joogta ah.

OSPI waxay wada shaqeeyeen Ururka Agaasimayaasha Dugsiyada Gobolka Washington (WSSDA) dayrtii 2016 si ay u sameeyaan muunad siyaasad degmo dugsiyeed oo dhamaystiran oo dib u eegid lagu sameeyay oo la xidhiidha waxbarashada carruurta iyo dhalinyarada derbi-jiifka ah. Dhamaan degmooyinka waa inay hirgaliyaan siyaasad (WSSDA 3115 ama wax u dhigma) si ay uga jawaabaan waxbarashada carruurta iyo dhalinyarada derbi-jiifka ah.

OSPI waxay abuurtay oo ay hirgalisay nidaamka xallinta khilaafaadka derbi-jiifka oo saddex heer 2002 si loo hubiyo in la xalliyo muranka meelaynta waxbarasho ee carruurta iyo dhalinyada derbi-jiifka ah si dhakhso ah.

Carruurta yaryar ee derbi-jiifka ah ee Washington waxay helaan barnaamijyada dugsiga kahor ee dadwaynaha, oo ay maamusho SEA ama LEA, sida ay u helaan carruurta kale ee Washington-ba. Sidoo kale, deeqaha McKinney-Vento ee tartanka leh ee lagu bixiyo OSPI ee la siiyo LEAs waxaa kamid ah isku dubbaridka iyo adeegyada bartilmaameed ee loogu talogalay ardayda wakhtiga hore/dugsiga kahor ee waajahaya derbi-jiifnimo si ay u galaan, u xaadiraan oo ay uga najaxaan barnaamiyada waxbarashada dugsiga kahor. Waxaa kamid noqon kara dadaaladan in meelo loo qabto, ururinta xog iyo samaynta qiimayn baahiyaha bulshada ee la xidhiidha ardayda wakhtiga hore ee derbi-jiifka ah.

Sharciga Washington waxaa shardi u ah in degmo dugsiyeedyada qaar ka tanaasuli karaan koorsooyin looga baahnaa si loo qalinjabiyo haddii koorso la mid ah oo kale si fiican loogu dhammaystirtay degmo dugsiyeed kale, sidoo kale waxa uu degmo dugsiyeedyada uga baahan yahay inay isku darto dhibcaha qaybta ah, koorsadada aan la xallin, ama aan dhammaystirnayn, oo bixiso fursado dhibcuhu ku ururayaan qaab meesha lagaga saarayo caqabada ardayda haysta ee waxbarasho iyo kuwaan waxbarasho ahayn. Sidoo kale, degmo dugsiyeedyada waa inay siiyaan dhibco qayb ah wixii shaqo koorso ah ee la dhammaystiray kahor taariikhda qaadashada ama gudbinta, dugsiga helayaana waa inuu dhibcahaa aqbalaa waana inuu ku daraa waxqabadka waxbarasho ee ardayga ama qalinjabintiisa, ama labadaba; oo uu ardayga u oggolaadaa inuu heli karo dhibco taariikhda uu doono ha kusoo biiree dugsiga cusub.

OSPI waxay sugaysaa in carruurta iyo dhalinyarada derbi-jiifka ahi *kuwaas oo buuxiyay shuruudihii u qalanka,* inayna la kulmin carqalado si ay u helaan hawlaha waxbarashada iyo wixii waxbarshada ka baxsan. Carruurta iyo dhalinyarada derbi-jiifnimadu la soo daristo waa inay ku biiraan waana inay si buuxda uga qaybgali karaan dhammaan hawlaha dugsiga markay buuxiyaan shuruudaha looga baahan yahay. Ciyaaraha, oo ay kamid yihiin kooxda magaca dugsiga waa hawlaha dugsiga. Xafiiska Kormeeraha guud ee Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction) wuxuu kala shaqeeya Ururka Ciyaaraha Fudud ee Dugsiga Dhexdooda ee Washington (WIAA) la xidhiidha mutaysiga ciyaaraha fudud ee ardayga. Ururka ciyaaraha fududi waa inay u hoggaansamaan shuruudaha Xeerka McKinney-Vento, oo ay meesha ka saaraan caqabadaha ardayda derbi-jiifka ah kuwaas oo haddii kale xaq u leh kaqaybqaadashada ciyaaraha; uu fiiro gaar ah u yeeshaa shuruucda kaqaybgalka ee la xidhiidha xaadirista iyo degganaanshaha.

Ardayda ay la soo daristo xaalad derbi-jiif waa inay si siman u helaan dhammaan barnaamijyada dugsiga, kuwaas oo ay kamid yihiin dugsiyada magnetka, dugsiyada xagaagii, barnaamijyada waxbarashada shaqada iyo farsamada, meelaynta heerka sarraysa, waxbarashada onlaynka ah iyo barnaamijyada dugsiga jaartarka.

Barnaamijka OSPI ee McKinney-Vento waxa uu ka shaqeeyaa sidii uu meesha uga saari lahaa caqabadaha la xidhiidha tallaalka iyo diwaanka kale ee caafimaad isagoo u maraya isku dubbarid joogto ah oo ulakac ah oo lala sameeyo degmo dugsiyeedyada iyo sidoo kale hay'adaha kale ee u shaqeeya ardayda derbi-jiifnimadu la soo deristo.

Sharciga Washington (RCW 7.70.065) waxa uu iminka u oggolaaday xidhiidhiyayaasha derbi-jiifka dugsiga, kalkaaliyayaasha caafimaadka dugsiga iyo la-taliyayaasha dugsiga inay siiyaan oggolaansho laga warqabo marka xaalad caafimaad ee aan degdegga ahayni jirto iyagoo malaya bukaanada sabiga ah kuwaasi oo ah dhalinyaro cidna aan lahayn iyo kuwa buuxiya waxa loo yaqaan ilmaha ama dhalinyarta derbi-jiifka ah sida uu dhigayo xeerka Waxbarashada Derbi-Jiifka McKinney-Vento ee federaalku. Qaybtan cusub ee lagu daray ee helitaanka daryeelka caafimaad ee dhalinyarada nuqul ee cidna aan lahayn ee darbi-jiifka ah, kuwaas oo laga yaabo inayna heli karin caafimaadka caadiga ah iyo daryeelka caafimaadka ilkaha barigii hore, waxay muhiim u noqonaysaa inay ka jawaabto baahiyaha daryeelka caafimaad ee bulshadan dhalinyarada ahi si ay halkaa uga sii socoto.

Sharciga Washington waxa uu ka mamnuucay degmo dugsiyeedyada inay ugu diidaan inay kusoo biiraan ardaydu maadaama oo ayna lahayn xaqiijin meesha ay deggan yihiin. RCW 28A.225.215 wuxuu sheegayaa in

aanay degmo dugsiyeed uga baahnayn xaqiijin degganaansho ama wixii kale ee macluumaad ah ee la xidhiidha cinwaanka ilmaha haddii aanu ilmuhu lahayn cinwaan sharci ah. Sidoo kale, degmo dugsiyeedyada waa inay qaataan ilmo kasta oo gaadhay da'dii dugsiga oo xaq u leh inuu ku biiro iyada oo aan loo eegeynin sharciga degganaanshaha oo ilmaha laga dalbado ama waalidka ama cida kale ee ilmaha korinaysa.

Dhamaan xidhiidhiyayaasha LEA waxay qaataan tabobar la xidhiidha shuruudaha gobolka iyo federaalka ee gelitaanka dhakhsaha ah ee ardayda derbi-jiifka ah. Xidhiidhiyayaasha deegaanka ee la tabobaray waxay la shaqeeyaan qoysaska iyo dhalinyarada aan cidna lahayn si ay u heli karaan wixii waraaqo ah oo caadiyan loog baahan yahay siday ugu biiraan, sida shahaadada dhalashada, diwaanka dugsiga, ama wixii kale ee waraaqo ah, wixii kharash ahna ee la xidhiidha helitaanka waraaqahan waxaa bixinaya deeqda OSPI maamusho ee McKinney-Vento, ama taakulada dahqaale ee Loo Asteeyay Derbi-jiifka Cinwaanka I, Qaybta A.

Ardayda ay haysato derbi-jiifnimo mararka qaar waxay leeyihiin mushkilado xagga haynta ah, waxaanal laga yaabaa iany la deggan yihiin cid aan ahayn waalidka ama wakiilada. Xidhiidhiyuhu waxa uu ka helaa kaalmada farsamo OSPI iyo gudbinaha khayraadka jira si uu uga jawaabo caqabadaha ay keeneen xaaladahan.

Abaalmarinaha deeqda dhaqaale ee McKinney-Vento waxay u isticmaali kartaa dhaqaalaha si loo siiyo dirays habboon, ama dharka kale ee dugsiga ee daruuriga u ah inay xaadiraan oo kaqaybqaataan dugsiga.

Barnaamijka McKinney-Vento waxa uu ku bixiyaa aqoon-iswaydaarsiyo Shirarka La-taliyayaasha Dugsiyada OSPI ee Sanadkii si uu kor ugu qaado wacyiga sidoo kale ula wadaago shuruudaha Xeerka McKinney-Vento la-taliyayaasha dugsiga, si kor loogu qaado helitaanka macluumaadka iyo wacyiga ardayda derbi-jiifka ah ee waxbarashada sare, oo ay kamid tahay dhammaystirka FAFSA, nidaamyada taageerada kuuliyadda, iyo magacaabidda xaalada ardayga madaxabannaan.

## Sidoo Kale Fiiri

- Waxbarashada Caruurta iyo Dhalinyarada Derbi Jiifka ah
- Xogta Carruurta iyo Dhalinyarada Derbi-Jiifka ah